# DIB U DHIGISTA KHATARTA AH 2

QIIMAHA WAXQABAD LA'AANTA



JAMEEL OBSERVATORY

Save the Children

OXFAM



Diyaara waxay dhex taagan tahay meydka xoolihii qoyskeeda ee Wajeer, Kenya. [Sawirka: Khadiija Faarax/Oxfam/February 2022]

# SOO KOOBID GUUD

Adduunka oo dhan, 181 milyan ayaa la saadaalinayaa inay wajahayaan macluul daran sanadka 2022. Oxfam iyo Save the Children ayaa ku qiyaasay in guud ahaan Itoobiya, Kenya iyo Soomaaliya, celcelis ahaan hal qof ay u badan tahay inuu u dhinto 48 ilbiriqsi kasta gaajo daran oo la xiriirta colaad, COVID -19, xiisadda cimilada iyo sicir-bararka iyo cadaadiska suuqa oo ay kordhiyeen iskahorimaadka hadda ee Ukraine. Horumarka adag ee laga gaaray yoolalka Horumarka waara iyo malaayiin carruur ah noloshooda ayaa hadda halis ku jirta haddii aan tallaabo degdeg ah la qaadin si looga hortago macluusha. Laakiin ka hortagga dadku inay u dhintaan macaluul iyada oo aan la helin xal siyaasadeed si wax looga qabto Caqabadahan hoos ku xusan - oo ay ku jiraan sinnaan la'aanta, iskahorimaadka iyo isbedelka cimilada, ma joojin doonto dhibaatooyinka meertada ah - iyo kuwa la saadaalin karo - ee ay la kulmaan malaayiin qof oo adduunka ah. Macluushani jirtaa waa fashil siyaasadeed.

Sanadkii 2011, Soomaaliya waxaa ka dhacday macluul aad u ba'an oo dishay in ka badan rubuc milyan qof - kala bar waxay ahaayeen caruur da'doodu ka yar tahay 5 sano jir . Beesha caalamka waxay ku guuldareysatay inay wax ka qabato waqtigii loogu talagalay, in kasta oo ay soo noqnoqdeen digniino ku saabsan dhibaatada soo socota. Musiibadan ka dib, madaxda gobolku waxay ballan qaadeen inay soo afjarayaan xaaladaha degdegga ah ee abaarta sanadda 2022. Beesha caalamku waxay isku dayday in aanay dib u dhicin guul-darrooyinka sababay macluusha oo ay dhegaysan doontaa digniinaha oo si ay uga falceliyaan wakhti hore, si loo baaqsado dhibaatada.

Hase yeeshee, in ka badan toban sano laga soo bilaabo macluushii 2011, iyo in kasta oo ay jiraan digniino iyo qeylo dhaan kala duwan labadii sano ee la soo dhaafay, talaabooyinka la qaaday waxa keeneen qalbi-jab. Waxaan mar kale dhibaatada jirta ka jawaabnay xili aad u dambeeya si aan uga hortagno dhibaatada. Ku dhawaad nus malyuun qof oo ku nool guud ahaan Soomaaliya iyo qeybo ka mid ah dalka Itoobiya ayaa wajahaya xaalado macluusha oo kale ah, iyadoo haweenka ay si gaar ah u saameysay. Kenya, 3.5 milyan oo qof ayaa la ildaran heerar macaluul ah, waxaana saadaasha Qaramada Midoobay ay soo jeedinaysaa in 350,000 oo carruur Soomaaliyeed ah ay dhiman karaan xagaaga haddii dowladaha

iyo deeq-bixiyeyaasha aysan si degdeg ah wax uga qaban cunto yarida iyo nafaqo-xumada. Tirada dadka wajahaya xaaladan adag oo ku nool Itoobiya, Kenya iyo Soomaaliya ayaa in ka badan laba jeer korodhay tan iyo sannadkii hore, iyada oo ahayd in ka badan 10 milyan ayay hadana gaartay in ka badan 23 milyan oo qof.

Guuldarada in la dardar geliyo horumarka laga gaaray wax ka qabashada isbdelka cimilada iyo ka hortagga colaadaha aduunka ayaa hadda sii waaraya nidaamka lagu tiirsado gargaarka bini'aadantinimo ee aan ahayn nashqadeeyay - oo aan loo hayn - si looga jawaabo jahawareerka meertada iyo la saadaalin karo heerkan oo kale. Baahida sidan oo kale ah oo sii kordheysa ma awoodi karno in aan sugno xaaladaha degdega ahi in ay sii bataan, waa in aan horay u qaadnaa talabooyink degdeg ah oo aan kaga hortagayno khataraha la saadalin karo in ay dhibato wayn kenaan. Tani waxay u baahantahay wada shaqayn aad u wayn oo dhexmarta dawladaha, horumarka, bini'aadantinimada, nabada iyo jilayaasha cimilada.

Oxfam iyo Save the Children waxa ay iskaashi la sameeyeen Jameel Observatory si ay u baaraan isbeddellada ku yimaadda tallaabada la filayo iyo jawaabta tan iyo 2011 ee Geeska Afrika. Kooxda cilmi-baadhistu waxay kala tashadeen daneyayaasha maxalliga ah, bulshooyinka iyo hawl-wadeennada caalamiga ah go'aan-qaadashada iyo ficilka ay kaga jawaabayaan macluumaadka digninaha ugu horeeya.

Cilmi-baadhistu waxay muujinaysaa saamaynta maalgashiga dawladaha iyo maamulka degaanku ku leeyihiin daryeelka bulshada, hababka bixinta digniintaha hore , iyo doorka xubnaha bulshada iyo ururada maxaliga ah ee qaadista tillaabooyinka ka hortaga ah. Si kastaba ha ahaatee, waxa ay sidoo kale muujinaysaa in dawladaha iyo hay'adaha caalamiga ahi ay wali ka jawaab celinayaan saamaynta abaarta, halkii ay maareyn lahaayeen khatarta abaarta ka hor, waxaanay la halgamayaan sidii ay tallaabo ku filan uga qaadi lahaayeen xogta digniinta hore.

Natiijooyinka muhiimka ah ee cilmi-baarista maaha kuwo u gaar ah Geeska Afrika. Bulshooyinka iyo hawl-wadeennada maxalliga ah ayaa had iyo jeer ah kuwa ugu horreeya ee qaadaya tallaabo lagu badbaadinayo noloshooda iyo u diyaargarowga saamaynta abaaraha iyo fatahaadaha, laakiin dhaqaalaha la siiyo hay'adaha maxalliga ah ayaa ah mid aad u hooseeya. Nidaamyada daryeelka bulsheed ee ay dowladdu hogaamiso ee loogu talagalay in ay dadka ka difaacaan shooggu inta badan waxay bixiyaan jawaabo badan oo kharash-ku-ool ah wakhtigi ku haboonaa, laakiin wax badan ayaa loo baahan yahay in la sameeyo si loo hubiyo inay yihiin kuwo loo dhan yahay, diiradda saaraya carruurta iyo jinsiga, oo lala xiriirinayo nidaamyada lacagta caddaanka ah ee bixyaan hay'adaha ka shaqeeya arimaha bani'aadamnimada.

Qorshayaasha cusub ee lagu odorosi doono saameynta dhibaatooyinka ay ku yeelan karaan bulshooyinka waxay muujinayaan yididiilo fiican, laakiin wali la maalgalin ama laguma dhexdarin hawlaha bini'aadantinimo, horumarka iyo cimilada iyadoo la eegayo qiyaasta loo baahan yahay si loo ilaaliyo bulshooyinka ka hor inta aysan dhicin dhibaatadu. Xafiisyo aan nidaamsanayn iyo doono shaqiyaeed oo ka jirta dalka iyo dunidaba ayaa waxay sidoo kale dib u dhac ku keenayaan dedaalada la wdo si loo qaado talaabooyin la hubo.

Waxa laga yaabaa in loo arko cudurka faafa ee COVID-19 ama dagaalka Ukraine inay yihiin dhacdooyin hal mar ah. Si kastaba ha noqotee, labada dhacdo waxay muujinayaan nuglaanta qoto dheer iyo isku xirnaanta nidaamyada ay malaayiin qof ku tiirsan yihiin si ay u noolaadaan. Marka aynu si qoto dheerayno dhibaatooyinka ka dhasha isbedelka cimilada ee aadka u daran iyo arrimaha la xidhiidha - oo ay ku jiraan xidhiidhka ka dhaxeeya dhibta ka dhalata isbedelka cimilada iyo colaadaha - ayaa sii kordhin doona. Haddii isbeddellada hadda socda ay sii socdaan, tirada masiibooyinka sannad kasta adduunka waxa laga yaabaa inay ka korodho qiyaastii 400 ee 2015 ilaa 560 marka la gaaro 2030. Nidaam ka jawaab celineed oo kaliya ma awoodi doono inuu diyaariyo ama ka jawaabo caqabadaha sanadaha soo socda.

Dhibaatada gaajada ee 2022-ka waxaan mar kale aad uga daahnay waxqabadkii la filayey – bulshadu hadda waxay ku jiraan ilko dhibaatada, kaliya maalgelin degdeg ah oo loogu talagalay wax ka qabashada arimaha bini'aadantinimada ayaa badbaadin karta nolosha - laakiin dhibaatada soo socota waa inaan la nimaadno tababusho kan fiican kan hada. Warbixintani waxa ay ku talinaysaa in isbedel lagu sameeyo labada hab ee ku xeeran talaaboyinka la filayo iyo sida loo maalgeliyo. Tan waxaa ka mid ah maalgelin toos ah oo la siiyo ururada maxalliga, la-tashiga hoggaamiyeyaasha bulshada, kordhinta isku-dubbaridka xidhiidhka ka dhaxeeya dedaalada ku hawlan cimilada, horumarka, dawladda iyo nabadda, iyo

balaadhinta nidaamyada daryeelka bulshada iyo ficil la filayo. Lacagaha loo qorsheeyey arimaha lama filaanka ah waa in la kordhiyaa, laakiin sidoo kale waa in la fududeeyaa si loo oggolaado in si degdeg ah loo isticmaalo. Maalgelin Debecsanaan, la isku halayn karo, sanado badan ayaa weli ah furaha, sidoo kale ka mid noqoshada dhabta ah ee haweenka go'aan qaadashada jawaabaha ee heer deegaan, heer qaran iyo heer caalami.

Toban sano ka hor, waxaan nidhi maya macaluul dambe. Malaayiin qof oo mar kale qarka u saaran macaluul waanu ku guul darreysannay ballan qaadkaas. Waa inaan hadda ka jawaabnaa, si miisaan leh, si aan uga hortagno musiibo kale, laakiin sidoo kale waa inaan baranaa casharradii tobankii sano ee la soo dhaafay si aan u hubinno in marka xigta aan u dhaqaaqno si taxaddar leh si aan uga fogaano dhibaatada. Maaddaama masiibada cimiladu ay khatar gelinayso mustaqbalka xasaradaha sii kordhaya, ma awoodno in aan balankaas ka baxno markale.

## DIGNIINUHU WAA AY JIREEN

- Roobabkii 2020-ka Maarso-Abriil-May (MAM) ayaa ahaa kuwa liita koonfurta Soomaaliya. Bisha Juunyo ama Julaay 2020 waxaa dhici kartay in talaabooyin la filan karo la qaado.
- Bishii Ogosto 2020, Shabakadda Nidaamka Digniinta Hore ee Macluusha (FEWS NET) ayaa saadaalisay in labada xilli ee soo socda ay liitaan, oo ay u badan tahay inay kor u qaadaan baahiyaha gargaarka cuntada ee sarreeya.
- Bartamihii Meey 2021, Kooxaha Haqab-beelka Cuntada iyo Nafaqada (FSNWG) ayaa ku baaqay tallaabo degdeg ah waxayna FEWS NET soo saartay digniin ah in abaarta xilli-xilliyeedka badan ay u badan tahay inay sii jiri doonto illaa dhammaadka 2021-ka.
- 8dii Sebtembar 2021, Kenya waxay si rasmi ah ugu dhawaaqday in abaarta ka jirta qeybo ka mid ah dalka ay tahay musiibo qaran.
- 31kii Oktoobar 2021, Maamulka Badweynta iyo Hawada Qaranka (NOAA) ayaa ka digay 87% suurtagalnimada La Niña - sanadka labaad oo isku xigta. Tani waxay daba socotaa La Niña sannadihii 2016-17, markii Bariga Afrika ay u dambaysay dhibaato gaajo.
- 23-kii Noofambar 2021, Dowladda Federaalka ah ee Soomaaliya ayaa ku dhawaaqday xaalad degdeg ah oo ka dhalatay abaarta.
- Bishii Nofembar 2021, FEWS NET waxay soo saartay digniin ah in abaar aan hore loo arag ay ku soo fool leedahay gobolka haddii roobabku ay sii xumaadaan.
- Bishii Febraayo 2022, FAO iyo WFP waxay soo saareen digniin hore oo ah in cunto yarida ba'an ay u badan tahay inay ka sii dari doonto dalal badan.
- Bishii Abriil 2022, Warbixinta Saadaasha Haqab-beelka Cunnada Ba'an ee IPC ee Soomaaliya ayaa ka digtay halista macaluul ee ka jirta qaybo ka mid ah dalka, iyadoo xustay in cunto yarida ay aad uga sii dartay tan iyo bilowgii 2022-ka iyo in 'aad iyo aad uga sii darto' la filayo Ilaa ugu yaraan Juun 2022. Ururka Saadaasha Hawada Adduunka ayaa soo saaray digniin adag:

  *"Rajada dhabta ah ee ah in roobabku ay di'i doonaan xilli afaraad oo xiriir ah, taasoo Itoobiya, Kenya iyo Soomaaliya gelinaysa abaar aan la kulmin 40-kii sano ee la soo dhaafay..."*

# RAAD-RAAC


1 Warbixinta Caalamiga ah ee Dhibaatooyinka Cuntada (GCFR) - 2022 laga helay https://www.wfp.org/publications/global-report-food-crises-2022

2 Faahfaahinta xisaabinta ayaa lagu muujiyey qaybta Habraaca ee hoose

3 Dhimashada dadka koonfurta iyo bartamaha Soomaaliya ee ay saamaysay cunto yari ba'an iyo macluusha intii lagu jiray 2010-2012, Waxaa laga heli karaa https://fsnau.org/products/research-studies.

4 Qalabka Dabagalka Dadweynaha ee IPC, laga heli karo https://www.ipcinfo.org/ipc-country-analysis/population-tracking-tool/en/

5 Qaramada Midoobay. (2022, 8 Febraayo). Abaaro Ba'an Oo 13 Milyan Oo Gaajo Halis Ku Haya Geeska Afrika. Laga soo celiyay May 2, 2022, laga bilaabo https://news.un.org/en/story/2022/02/1111472

6 Iyada oo ku saleysan aaladda raadraaca IPC ee isbarbardhigga tirooyinka May 2021 iyo Meey 2022

7 UNDR. (2022). GAR2022: Adduunkeena Khatarta Ugu Jira: Wax Ka Bedelka Dawladnimada Mustaqbal Adag. b.17. Laga soo celiyay 2 Meey 2022, laga bilaabo https://www. undrr.org/gar2022-our-world-risk